

Faallooyinka ku saabsan dugsiga barbaarinta, dugsiga hoose iyo xarunta nasashada.

Dugsigayaga barbaarinta, dugsiyada hoose iyo xarunta nasashada waxay si joogta ah uga shaqaynayaan horumarinta hawlahooda. Sidaas awgeed, faallooyinkaaga waxay muhiim u yihiin horumarka dugsiga iyo tayada shaqada. Haddii dugsiga barbaarinta, dugsiga hoose ama xarunta nasashada aanay buuxin filashooyinkaaga, ama haddii adiga ama ilmahaagu aanu ku faraxsanayn shayna, fadlan la xidhiidh Xafiiska Carruurta ee Waxbarashada sida hoos lagu sharaxay.

Dadka ugu horeeya ee lagala xidhiidhayo walaacyadaada waa shaqaalaha xaga dugsiga barbaarinta iyo xarunta nasashada, ama macalinka/barasha madaxda ka ah ururka su'aashu ka taagantahay. Haddii aanad ku qanacsanayn wax ka qabashada kiiskaaga, waxaad tegi kartaa Xafiiska Carruurta iyo Waxbarashadda ee degmadda. Faallooyinka iyo cabashooyinka suuragalka waa la baadhi doonaa oo waxaa wax looga qaban doonaa sida loogu baahdo. Markaa, faallo celinta waxaa la siin doonaa qofka markii ugu horaysay bixiyay macluumaadka, iyo ururka su'aasha ka taagantahay.

Si aad dhijitaal ahaan ug soo gudbiso faallooyinkaaga, riix batanka bogga. "faallooyinka ama cabashooyinka". *Waxaad, dabcan, xaq u leedahay inaad soo gudbiso faallooyinka iyo cabashooyinka magaca oo la qarinayo, laakiin haddii aad jeclaan lahayd faallo celin gaar ah oo kiiskaaga ah, waxaad u baahan doontaa inaad magaca bixiso iyo faahfaahinta xidhiidhka.

Haddii aanad haysan fursadda la isugu diiwaangeliyo aragtidaada dhijitaal ahaan, fadlan ugu dir iyaga boosta:

Bollnäs kommun
Barn- och utbildningskontoret
Stadshustorget 2
821 80 Bollnäs

Haddii aanad ku qanacsanayn sida ay wax uga qabanayso degmaddu faallooyinkaaga iyo cabashooyinka, waxaad u soo diri kartaa warbixin [Guddida La socodaka Dugsiyada Swedishka](#).

Haddii aad hayso wax faallooyin ah ama cabashooyin ah oo ku saabsan dugsiyada barbaarinta, dugsiyada hoose ama xarumaha nasashada ee degmadda, waa in aad toos ugu tagtaa ururada ku shuqulka leh.

Wixii faallooyin ah ee ku saabsan dugsiga sare ama dugsiga sare ee ardayda baahiyaha gaarka ah leh, waa inaad booqataa Ururka Waxbarashada Hälsingland www.hufb.se

[Halkan riix wixii ah aragtiyahaaga ama cabashooyinka.](#)

" Faalada waa nidaamka qoraalka Degmadda Bollnäs wax ka qabashada cabashooyinka sida lagu sharaxay cutubka 4, qaybta 8, ee Xeerka Waxbarashadda (2010:800).